



Si loo helooga boos dugsiyada

Waa qasab in aannu helno  
adiga codsigaaga

Ugu dambeeyn 15ka  
diseembar.

## Doorashada dugsiya inta ka horreeysa fasalka barbaarinta dugsiya

Fasalka barbaarinta dugsiya waa talaabada ugu horeysa ee loo qaado dugsiya hoose dhexe. Ujeedada hawl qabadkaasu waa in lagu duwo oo la soo wado ilmo kasta waxbarashadiisa iyo horumarkiisa. Fasalka barbaarinta dugsiya waa qasab dhammaan carruurta ku nool dalka Iswiidhan laga billaabo xilliga dayrta ee sannadka a yiyagu lix sano jirsanayaan. Shaqada fasalka barbaarinta dugsiya waxa ay ku dhacdaa xiriir dhow oo lala yeesho fasallada kale ee dugsiya iyo aqalka waqtiyada firaqada. Fasalka barbaarinta dugsiya waxa uu daboolaa ugu yaraan 20 saacadood todobaadkii. Dugsi kastaa isaga ayaa ka gaaraya go'aan ah sida wakhtiga loogu kala qaybinaayo maalmaha.

Si aad adigu u hesho hagitaan ku saabsan go'aankaaga, dugsiyadu waxa ay kugu martiqaadayaan shirarka macluumaadka. Halkaas waxa aad adigu ka heli kartaa fursad aad ku waydiiso su'aalo oo aad fikrad ka qaadato wax qabadka. Haddii aad adigu u baahan tahay turjumaan kulanka macluumaadka, soo ogeysiinta dugsiya waqti fiican. adigaana qaba su'aalo ku saabsan wax qabadka dugsiya gaarka ah ama raba in aad ilmahaaga geeyso dugsiya gaarka ah, la xiriir maamulaha dugsiya gaarka ah [anette.ekskog@falun.se](mailto:anette.ekskog@falun.se)

### Codsiga

Haddii aad adigu rabto in aad boos ka hesho dugsiyada degmada, waxa aad buuxinaysaa doorashada koowaad, tan labaad iyo saddexaad ee foomka ku lifaaqan "**Doorashada dugsiya ee fasalka barbaarinta dugsiya**". Codsigu waa in uu noqdaa: Degmada Falu, Maamulka Carruurta iyo Waxbarashada, 791 83 FALUN, **waa in ay na soo gaarto December 15 ugu dambayn**. Falu kommun, Barn- och utbildningsförvaltningen, 791 83 FALUN, Adiga codsigaag soo gudbi wakhti fiican si ay noo soo gaarto wakhtiga loo qabtay gudaheed. Annagu wax mas'uuliyad ah nama saarno haddii boostada ay qaadato waqti ka badan intii la filayay.

### Waa muhiim in la gudbiyo codsiga

Waa muhiim in aad doorato dugsi sababta oo ah si toos ah xaq uguma lihid boos dugsi degmo oo ku xidhan ciwaanka gurigaaga. Dugsiyada qaarkood boosas way ku yar yihiin sidaas darteed waa muhiim in aad geliso saddex doorasho. Adiga oo dooranaya dugsi inta lagu guda jiro waqtiga codsiga, marka habka xulashada dugsiya sii socdo, waxa aad kordhinaysaa fursadahaaga in aad hesho dugsiya aad dooratay. Waxa kale oo aad haysataa ikhtiyaarka ah in aad sheegto mudnaanta walaalaha iyo in aad calaamadiso in aad rabto in aad saf u gasho doorashadaada koowaad.

### Xaqiijinta in codsiga la helay

Adiga waxa aad ku heli doontaa xaqiijin email ahaan in codsigaagii la helay, waase haddii aad geliso ciwaanka iimaylka arjiga.

### Tilmaamaha ku saabsan meelaynta dugsiya

Macluumaadka ku saabsan hab-raacyadayada meelaynta dugsiya ee fasalka barbaarinta dugsiya ayaa halkan ku lifaaqan.

### Ogeysiinta meelaynta dugsiya

Ugu dambayn 1da Febraayo, waxaad heli doontaa ogeysiinta ku saabsan meelaynta dugsiya iyada oo loo marayo warqad cinwaanka diiwaangelinta madaniga ah ee ilmaha.

### Codsiga boos ee xarunta firaqada

Haddii aad adigu u baahan tahay sii daryeel ka hor iyo ama ka dib maalmaha dugsiya, waxaa jira aqalka waqtiyada firaqada oo lacag ah. Aqalka waqtiyada firaqada waxa ay furan yihiin laga billaabo bisha Ogosto. Dugsiya wuxuu ku ogeysiin doonaa wakhtiga fiican ee ah taariikhda saxda ah. Adigu waxa aad boos ka dalbanaysaa aqalka waqtiyada firaqada bogga degmada falun.se – Ka codso meel aqalka waqtiyada firaqada, marka aad hesho ogeysiinta ku saabsan meelaynta dugsiya.

Codsiga waxaa la sameeyaa ugu yaraan 14 maalmood ka hor taariikhda meelaynta ee la doonayo. Inta lagu jiro muddada 1/6 - 31/8, waqtiyo ka baaraandegis dheer ayaa la filan karaa. Ma jiro wax saf ah oo ka jira aqalka waqtiyada firaaqada.

### **Codsiga gaadiidka dugsiga iyo kaarka baska**

Carruurta ku jirta fasalka barbaarinta ee dugsiga waxa ay xaq u leeyihiin kaarka baska dugsiga haddii masaafada u dhaxaysa ciwaanka diiwaangelinta madaniga ah iyo dugsiga meelaynta ay tahay laba km ama ka badan. Haddiise aad adigu doorato dugsi ka duwan kan aad ka tirsan tahay, lama hubo in aad adigu xaq u leedahay baska dugsiga, xitaa haddii fogaanta guriga ay dheer tahay. Adigu waxa aad ka dalbanaysaa kaarka baska ee dugsiga adiga oo isticmaalaya bogga degmada falun.se inta lagu jiro 6da maarso – 26ka maarso.

### **Si diirran ugu soo dhowoow dugsiga hoose dhexe ee Falu!**

Gustaf Malmberg

Maamulaha hawlaha ee dugsiyada hoose dhexe iyo kuwa gaarka ah

Degmada Falu  
maamulka carruurta iyo  
waxbarashada 023-830 00

**F** **LUN**